# Hagaha shaqaalaha ee nidaamka magdhawga shaqaalaha Minnesota

## Ka hel caawimaad dacwaddaada

Si aad caawimaad uga hesho dacwaddaada, la xiriir Miiska Caawinta Magdhawga Shaqaalaha ee lambarradiisu yahay 651-284-5005 (riix 3), 800-342-5354 (riix 3), ama iimaylka helpdesk.dli@state.mn.us. Caawimaad toos ah ayaa diyaar ah inta u dhaxaysa saacadaha 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo, maalmaha Isniinta ilaa Jimcaha.

## 1. Hordhac iyo sida loogu adeegsado hagahan

Marka aad ku dhaawacanto ama ku xanuunsato shaqada dhexdeeda, habka loo helo faa'iidooyinka aad xaqa u leedahay marka loo eego sharciga Minnesota wuxuu u muuqan karaa mid qalafsan oo murugsan. Hagahan wuxuu si kooban u sharxayaa sida sharciyada hadda jira ee Minnesota ugu dabaqmaan dhaawacyada ama cudurrada la xiriira shaqada ee dhacaya wixii ka dambeeya Oktoobar 1, 1995. Ujeeddadiisu waa inuu bixiyo macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan nidaamka iyo faa'iidooyinka magdhawga shaqaalaha Minnesota. Looma tixgelinayo sharaxaad dhammaystiran oo ku saabsan nidaamka magdhawga shaqaalaha mana aha inuu bixiyo talo sharciyeed.

Haddii aad qabto su'aalo, tixraac qoraalka sharciga, la xiriir Miiska Caawinta Magdhawga Shaqaalaha ee Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (DLI) lambarrada 651-284-5005 (riix 3), 800-342-5354 (riix 3) ama iimaylka helpdesk.dli@state.mn.us.

## 2. Waa maxay magdhawga shaqaalaha?

Haddii aad ku dhaawacanto shaqada, ha ahaato dhaawac shaqadaada sababay ama xaalad aad horey u lahayd oo shaqadaada ka sii dartay, caymiska magdhawga shaqaalaha ayaa bixinaya faa'iidooyinka. Faa'iidooyinka waa la bixiyaa haddii ay adiga khaladkaaga tahay ama ay tahay khaladka shaqo-bixiyahaaga. Nooc kasta oo dhaawac ah ayaa dabooli karaa faa'iidooyinka, oo ay ku jiraan dhaawacyada gaar ahaaneed sida wax kugu soo dhaca, dhaawacyada dhaca waqti dheer ka dib hawlo shaqo oo is-daba-joog ah, dhaawacyada ka dhasha waxyaabo aad neefsatay iyo marmarka qaar dhaawacyada la xiriira culeyska maskaxda.

Shaqo-bixiyahaaga ayaa bixinaya kharashka caymiska. Marka laga reebo shaqo-bixiyeyaasha si gaar ah looga dhaafay, dhammaan shaqo-bixiyeyaasha Minnesota waa inay haystaan caymiska magdhawga shaqaalaha ama ay is-damaanad qaadaan.

Faa'iidooyinka magdhawga shaqaalaha waxaa ka mid noqon kara:
- bixinta daryeelka caafimaad ee la xiriira dhaawaca, inta uu yahay mid macquul ah oo lagama maarmaan ah;
- bixinta qayb ka mid ah dakhligaaga lumay sababta dhaawaca awgeed;
- faa'iidooyin ku saabsan dhaawac joogto ah oo gaaray jirkaaga;
- caawinta dib-u-tababarka xirfadeed haddii aadan awoodin inaad ku noqoto shaqadaadii ama shaqo-bixiyihii aad hore ugu shaqeyn jirtay dhaawacaaga ka hor;
- kharashaadka safarka iyo baarkinka ee la xiriira helitaanka daaweyn caafimaad ama hawlo gaar ah oo ku saabsan dib-u-tababar xirfadeed;
- faa'iidooyin loogu talagalay xaaskaaga iyo dadka kugu tiirsan haddii aad shaqo-dhaawac darteed u dhimatay.

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

## 3. Sida looga helo macluumaadka dacwaddaada ee DLI

Waaxda Shaqada iyo Warshadaha Minnesota (DLI) waxay siisaa marin online ah oo aad ku heli karto macluumaadka ku saabsan dacwaddaada magdhawga shaqaalaha adigoo adeegsanaya albaabka internetka ee Work Comp Campus. Waxaad heli kartaa macluumaadka ku saabsan dacwaddaada 24 saacadood maalintii, toddobo maalmood usbuucii. Si aad u isticmaasho Campus, waa inaad sameysato akoon adigoo booqanaya campus.dli.mn.gov/user/login. FWixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Campus, booqo dli.mn.gov/business/workers-compensation/work-comp-campus.

## 4. Maxaa dhacaya marka aad ku dhaawacanto shaqada

- Haddii aad ku dhaawacanto shaqada, ha sugin. U sheeg shaqo-bixiyahaaga dhaawaca sida ugu dhaqsaha badan. Waxaa suuragal ah inaad lumiso xaqaaga faa'iidooyinka haddii aadan ku wargelin dhaawaca waqtiyada loo asteeyay.
- Shaqo-bixiyahaaga waa inuu buuxiyaa Foomka Warbixinta Koowaad ee Dhaawaca (First Report of Injury) wuxuuna u dirayaa shirkadda caymiska shaqo-bixiyaha 10 maalmood gudahood laga bilaabo markii uu ogaaday inaad ku dhaawacantay oo aad shaqada ka maqantay.
- Marka aad dhaawaca soo wargelisid, caymiska wuxuu baarayaa dacwaddaada si uu u go'aamiyo in dhaawacu la xiriiray shaqada.
- Waa inaad shaqo-bixiyahaaga u sheegtaa daaweynta caafimaad ee aad helayso iyo xayiraadaha shaqada ee ku saabsan dhaawacaaga.
- Waa inaad caymiska u sheegtaa isbeddel kasta oo ku yimaada awooddaada shaqo. Sidoo kale waa inaad shaqo-bixiyahaaga iyo caymiska u sheegtaa haddii aad ku soo noqotay shaqada.

### Shuruudaha Dacwadeed PTSD ee La Daboolo

Minnesota gudaheeda, xaaladda kaliya ee caafimaadka maskaxda ee lagu dabooli karo magdhawga shaqaalaha (workers' compensation) iyada oo aan jirin dhaawac jireed waa Post-Traumatic Stress Disorder (PTSD). Dhaawac kasta oo kale oo caafimaadka maskaxda ah waa in uu si toos ah ula xirnaadaa dhaawac jireed si uu u noqdo mid la daboolo.

Si aad u hesho magdhawga shaqaalaha ee PTSD gudaha Minnesota, waa inaad caddeyso laba arrimood: sabab caafimaad iyo sabab sharci. Si loo caddeeyo sababta , waxaa jira shuruudo gaar ah oo ay tahay inaad buuxiso:

1. dhaawaca waa inuu ka dhashay shaqadaada – si kale haddii loo dhigo, ogaanshaha PTSD waa inuu si toos ah ula xiriiraa waajibaadka shaqadaada ama deegaanka aad ka shaqeyso;
2. PTSD waa in lagu ogaadaa dhakhtar cilmi-nafsiyeed (psychiatrist) ama cilmi-nafsi yaqaan shati haysta (licensed psychologist), iyadoo la adeegsanayo buugga ogaanshaha cudurrada ee uu sharciga Minnesota farayo;
3. calaamadaha waa inay soconayaan ugu yaraan hal bil, isla markaana ay sababi karaan dhibaatooyin culus oo kaaga yimaada shaqadaada, noloshaada bulsho, ama dhinacyo kale oo muhiim ah; iyo
4. PTSD-da waa inaanay ka dhalan tallaabo edbin ah, qiimeyn shaqo, wareejin shaqo, shaqo-ka-joojin ku-meel-gaar ah (layoff), hoos-u-dhigid darajo (demotion), dallacsiin, shaqo-ka-eryid, hawlgab, ama tallaabo kale oo la mid ah oo loo-shaqeeyaha si daacad ah u qaaday.

PTSD waxay ku lug leedahay dib-u-xusuusashada dhacdadii naxdinta lahayd, ka fogaanshaha waxyaabaha xusuusinaya, dareen feejignaan xad-dhaaf ah ama walbahaar joogto ah, iyo isbeddello taban oo ku yimaada niyadda ama hab-fekerka.

## 5. Talooyin waxtar leh oo ku saabsan shaqaalaha dhaawacmay

Habka magdhawga shaqaalaha wuxuu soo saaraa waraaqo badan oo u dhexeeya shaqo-bixiyahaaga, shirkadda caymiska magdhawga shaqaalaha, iyo Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (DLI). Waa muhiim inaad kaydiso macluumaadka soo socda:

- nuqulada dhammaan dukumentiyada la xiriira dhaawacaaga, sida warqadaha, foomamka, jeegagga faa'iidooyinka, biilasha caafimaadka, iyo – gaar ahaan – Foomka Warbixinta Koowaad ee Dhaawaca;

- kharashaadkaaga safarka iyo baarkinka ee booqashooyinka caafimaadka iyo safarrada kale ee la xiriira dhaawacaaga;
- xusuus-qor ku saabsan wicitaannada taleefoon ee aad sameysay ama laguu soo diray ee ku saabsan dhaawacaaga.

Intaa waxaa dheer, ka fiirso qaadashada tillaabooyinkan si aad u maareyso dukumentiyada magdhawga shaqaalahaaga:

- dukumentiyada oo dhan ee aad u dirto Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (DLI), ku dar magacaaga, lambarka dacwaddaada ee DLI Campus ama lambarka aqoonsigaaga shaqaalaha (WID), taariikhda dhaawacaaga, magaca shaqobixiyahaaga, iyo magaca shirkadda caymiska ee shaqo-bixiyahaaga;
- sii shaqo-bixiyahaaga nuqulo dhammaan xayiraadaha shaqada ee ay soo saaraan dhakhaatiirtaada;
- fur dhammaan warqadaha laguu soo diro ee ka yimaada shaqo-bixiyahaaga, shirkadda caymiska magdhawga shaqaalaha, iyo Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (DLI);
- la xiriir Miiska Caawinta Magdhawga Shaqaalaha (eeg kor) haddii aad qabto su'aalo.

## 6. Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dacwaddaada

Waa inaad diiwaangelisaa magacyada iyo lambarrada taleefoon ee muhiimka ah ee la xiriira dacwaddaada, kuwaas oo ay ka mid yihiin.

| | |
|---|---|
| Taariikhda dhaawacaaga | |
| Magaca shirkadda caymiska | |
| Magaca iyo lambarka taleefoonka ee dib-uhabeynta dacwadda (claim adjuster) | |
| Lambarka dacwadda caymiskaaga | |
| Lambarka aqoonsigaaga shaqaalaha (WID) (marka uu DLI kuu qoondeeyo) | |
| Lambarka dacwaddaada ee DLI Campus (CL-xxxxxx-xxx) | |
| Macluumaadka gelitaanka akoonkaaga Campus | |
| Macluumaadka qorshaha daryeelka maareysan (haddii uu khuseeyo) | |
| Magaca iyo lambarka taleefoonka ee dhakhtarkaaga | |
| Magaca iyo lambarka taleefoonka ee lataliyaha dib-u-habaynta xirfadeed (QRC) | |
| Magacyada iyo lambarrada taleefoon ee kale ee muhiimka ah oo la xiriira dacwaddaada | |

## 7. Maxaa dhacaya ka dib marka shirkadda caymiska ay dib u eegto dacwaddaada

- Haddii dacwaddaadu ku lug leedahay waqti shaqo oo lumay, shirkadda caymiska waa inay kuu soo dirto Foomka Ogeysiiska Go'aanka Mas'uuliyadda Hore ee Shirkadda Caymiska. Foomkan waa in laguu soo diro 14 maalmood

gudahood wuxuuna kuu sheegayaa haddii dacwaddaada la aqbalay ama la diiday. Haddii dacwadda la aqbalo, waxay ka dhigan tahay in shirkadda caymiska si iskood ah u bixin doonto faa’iidooyinka; haddii dacwadda la diido, waxay ka dhigan tahay in shirkadda caymiska aysan si iskood ah u bixin doonin faa’iidooyinka.

- Waxaa laguu soo bandhigi doonaa lambarka dacwadda, waxaana suuragal ah in lagaa soo waco hagaajiyaha dacwadda caymiska si macluumaad dheeraad ah laguu weydiiyo.
- Haddii dacwaddaada la aqbalo, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto inaad hesho faa’iidooyinka soo socda: khasaaraha mushaharka, daryeel caafimaad, adeegyo dib-u-tababar xirfadeed, iyo bixinta magdhawga dhaawaca joogtada ah ee shaqada jirka.
- Haddii dacwaddaada si buuxda loo diido ama qayb ka mid ah loo diido, waxaad haysataa ikhtiyaarro (eeg qaybta hoose ee ah “Waxaad sameyn karto haddii shirkadda caymiska ay diido dacwaddaada”).

## 8. Faa’iidooyinka lacageed ee la heli karo

Faa’iidooyinka lacageed ee la heli karo ee loogu talagalay shaqaalaha dhaawacmay waa khasaaraha mushaharka, bixinta dhaawaca joogtada ah ee shaqada jirka, iyo lacagta safarka ee booqashooyinka caafimaadka iyo qaar ka mid ah booqashooyinka dib-u-tababar xirfadeed. Faa’iidooyinka geerida waxaa loo heli karaa qoyska shaqaalaha ku dhintay dhaawac shaqo awgiis.

### A. Khasaaraha mushaarka

Haddii aadan shaqeyn karin sababta dhaawacaaga awgeed ama aadan heli karin dhammaan mushaharkaaga sababta dhaawaca awgeed, shirkadda caymiska waxaa laga yaabaa inay bixiso faa’iidooyinka khasaaraha mushaharka. Waxaa jira saddex nooc oo faa’iidooyin khasaaraha mushaharka ah:  naafo ku-meel-gaar ah oo dhammeystiran (TTD); naafo ku-meel-gaar ah oo qayb ah (TPD); iyo naafo joogto ah oo dhammeystiran (PTD).

**Faa’iidooyinka khasaaraha mushaharka ee naafo ku-meel-gaar ah oo dhammeystiran**

- Maalinta ugu horreysa ee aadan shaqeyn karin, xitaa haddii ay tahay qayb ka mid ah maalintaas, waxaa lagu tixgeliyaa naafo.
- TTD lama bixiyo saddexda maalmood ee ugu horreysa marka aadan shaqeyn karin – tan waxaa loo yaqaan muddada sugitaanka. TTD waxay bilaabataa maalinta afraad. Haddii aad sii wado inaad shaqeyn kari waydo wixii ka dambeeya maalinta 10-aad, faa’iidooyinka khasaaraha mushaharka waxaa lagu bixin doonaa sidoo kale muddada sugitaanka.
- Shirkadda caymiska waa inay bilaabataa bixinta TTD 14 maalmood gudahood laga bilaabo markii shaqo-bixiyahaaga uu ogaaday inaadan shaqeyn karin.
- Faa’iidooyinka TTD waa laba-meelood saddex meel mushaharkaaga toddobaadlaha ah ee celceliska ah ee dhaawacaaga xilligiisa (iyadoo la raacayo xadka ugu badan iyo ugu yar).
- Sida caadiga ah, ma heli kartid in ka badan 130 toddobaad oo faa’iidooyinka TTD ah. Si kastaba ha noqotee, faa’iidooyinka mushaharka ee TTD waxaa laga yaabaa in la sii bixiyo haddii aad ku jirto barnaamij waxbarasho oo la oggolaaday oo dib-u-tababar shaqo ah.
- Faa’iidooyinka TTD waxaa lagu bixiyaa jadwalkii aad mushaharkaaga ku heli jirtay ka hor dhaawaca waxayna ka caaggan yihiin canshuurta.

**Faa’iidooyinka khasaaraha mushaharka naafo ku-meel-gaar ah (temporary partial disability – TPD)**

- Faa’iidooyinka TPD waxaa lagu bixiyaa haddii aad ku soo noqoto shaqada oo aad kasbato dakhli ka yar sabab ah dhaawacaaga awgeed, xitaa haddii aad ku laabato shaqadii hore ee shaqo-bixiyahaaga ama aad u shaqeyso shaqo-bixiye cusub.
- Faa’iidooyinka TPD waa laba-meelood saddex meel farqiga u dhexeeya celceliska mushaharkaaga toddobaadlaha ah ee xilligii dhaawaca iyo dakhligaaga toddobaadlaha ah ee hadda. Faa’iidooyinkan sidoo kale waa ka caaggan yihiin canshuurta.
- Dhaawacyada dhacay Oktoobar 1, 2018, ama wixii ka dambeeya, sida caadiga ah laguma siin karo in ka badan 275 toddobaad oo faa’iidooyinka TPD ah, mana heli kartid faa’iidooyinkan haddii 450 toddobaad ay ka soo wareegeen

tan iyo taariikhda dhaawaca. Xadidanahaani waxay u badan tahay inaan lagu dabaqi karin haddii aad ka qaybqaadaneyso barnaamij waxbarasho oo dib-u-tababar shaqo ah.

**Faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka ee naafo joogto ah oo dhammeystiran (permanent total disability – PTD)**

- Haddii aad marna dib ugu laaban karin shaqo joogto ah dhaawacaaga ka dib, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto faa'iidooyinka PTD.
- Qaddarka faa'iidooyinka PTD waa laba-meelood saddex meel mushaharkaaga toddobaadlaha ah ee guud ee aad kasbanaysay xilligii aad dhaawacantay, waana ka caaggan yahay canshuurta.
- Qaddarka faa'iidooyinkan waxaa lagu go'aamiyaa sharciga saameyn ku lahaa taariikhda dhaawaca. Waxaa lagu dabaqayaa qaddarro gaar ah oo ugu yar iyo ugu badan.

## B. Faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka waa la joojin karaa

Shaqo-bixiyahaaga ama shirkadda caymiska waxay aaminsan karaan inaadan sii wadanin helitaanka faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka. Haddii shirkadda caymiska ay rabto inay joojiso bixinta faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka, waa inay ku siisaa Foomka Ogeysiiska Ujeedada Joojinta Faa'iidooyinka Magdhawga Shaqaalaha (NOID). Ogeysiiska waa inuu sheego marka faa'iidooyinka la joojin doono iyo sababta loo joojinayo.

**Faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka waa la joojin karaa sababo kala duwan dartood.** Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- tirada ugu badan ee khasaaraha mushaarka toddobaadlaha ayaa la bixiyay;
- waad ku soo laabatay shaqada oo lumin maysid wax dakhli ah;
- 90 maalmood ayaa ka soo wareegay tan iyo markii lagu wargeliyay inaad gaartay heerka ugu sarreeya ee soo kabashada caafimaadka (taas oo macnaheedu yahay inaad bogsatay inta ugu badan ee suuragalka ah, xitaa haddii weli aad dareemayso xanuun ama calaamado);
- waxaad awood u leedahay inaad shaqeyso adoon wax xadidaad ah aadan ka qabin dhaawacaaga;
- waxaad awood u leedahay inaad shaqo ku laabato laakiin aadan raadin shaqo ama aad diiddo shaqo kugu habboon xayiraadahaaga.

Waad ka hor imaan kartaa go'aanka shirkadda caymiska oo waad codsan kartaa in shir ay la yeeshaan garsoore magdhawga shaqaalaha. Garsooruhu wuxuu go'aamin doonaa haddii shirkadda caymiska ay sax ahayd inay joojiso faa'iidooyinka khasaaraha mushaharkaaga.

**Haddii aad hesho foomka NOID oo aad ku qilaafsan tahay, waa inaad codsataa shir 12 maalmood gudahood, haddii kale waxaa jiri doona nidaam cabasho oo dheeraad ah. Faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka sida caadiga ah waa in la siiyaa ilaa taariikhda shirka.** Haddii aad u baahan tahay caawimaad, la xiriir miiska caawinta.

## C. Faa'iidooyinka naafonimada joogtada ah ee qayb ahaan (permanent partial disability – PPD)

- Faa'iidooyinka PPD waa lacag bixinta lumitaanka joogtada ah ee awoodda adeegsiga qayb jirka ka mid ah.
- Qaddarka lacagta la bixiyo waxaa lagu saleynayaa qiimeyn PPD ah oo uu bixiyo dhakhtar, taas oo lagu dhufto qaddar lacag cayiman si loo go'aamiyo faa'iidada la bixin karo.
- Jadwalka naafonimada waxaa laga heli karaa Xeerarka Minnesota Qaybta 5223 iyo Sharciyada Minnesota Qeybta 176.101, farqadda 2a.

## D. Faa'iidooyinka geerida iyo taageerada ku tiirsanaanta

- Xaasaska, carruurta, iyo kuwa kale ee ka tiirsan shaqaalaha ku dhintay shil la xiriira shaqada ama cudur shaqo awgiis waxaa laga yaabaa inay u qalmaan faa'iidooyinka ku tiirsanaanta muddo cayiman.
- Caymiska magdhawga shaqaalaha sidoo kale wuxuu daboolaa kharashaadka aaska; dhaawacyada dhacay taariikhda Abriil 28, 2000, ama wixii ka dambeeya, qaddarka ugu badan ee la bixin karo waa $15,000.
- Haddii dhaawaca uu dhacay Abriil 28, 2000, ama wixii ka dambeeya, lacagta waxaa loo bixinayaa hantida dhaxalka, haddii qofka dhintay uusan lahayn cid tiirsan.

- Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg Sharciyada Minnesota, Qeybta 176.111.

## 9. Faa'iidooyinka caafimaad ee la heli karo

Marka dacwaddaada la aqbalo, waxaa lagu bixin doonaa kharashka dhammaan daaweynta caafimaadka ee macquulka ah oo lagama maarmaanka ah ee la xiriirta dhaawacaaga shaqo, oo ay ku jiraan daawooyinka dhakhtar qoray.

- Waxaad dooran kartaa bixiyahaaga daryeel caafimaad xaaladaha badankood, marka laga reebo xaaladaha qaarkood ee shaqo-bixiyeyaasha ama caymiska ay adeegyo ka helaan qorshe daryeel maareysan oo shahaado haysta.
- Haddii aad gaari ku tagto ballamaha caafimaadka ama aad u tagto qaadashada daawooyinka, waxaad heli kartaa lacag celin safarka iyo baarkinka adiga oo u diraya dukumentiyada taageeraya kharashaadka safarka ama baarkinka shirkadda caymiska.
- Shirkadda caymiska ayaa laga yaabaa inay tilmaamto farmashiye ama farmashiyayaal aad u adeegsan karto helitaanka daawooyinka dhaawacaaga, haddii farmashiyaha uu ku yaallo 15 mayl gudahood gurigaaga.
- Hubi in bixiyahaaga daryeel caafimaad uu u diro dhammaan biilasha iyo macluumaadka taageeraya shirkadda caymiska. Macluumaadka taageeraya waa inuu sharaxaa sida daaweynta iyo kharashaadku ula xiriiraan dhaawacaaga shaqo.
- Bixiyahaaga daryeel caafimaad waa inuu ogeysiiyo shirkadda caymiska ka hor intaadan helin qalliin ama daaweyn u baahan isbitaal, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah. Adiga ama shirkadda caymiska waxaad codsan kartaa ra'yi labaad oo ku saabsan qalliin aan ahayn mid degdeg ah. Shirkadda caymiska waa inay bixisaa kharashka ra'yiga labaad. Looma qasbi karo inaad qalliin gasho haddii aadan rabin.
- Bixiyahaaga daryeel caafimaad toos kuugu soo dallici kari maayo ilaa ay shirkadda caymiska go'aamiso in daaweynta aysan la xiriirin dhaawac shaqo oo la aqbalay.
- Daaweynta bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ee aan shatiga haysan ee qaarkood lama bixinayo.
- Wixii faahfaahin dhammaystiran ee ku saabsan daaweynta, qalabka iyo sahayda daboolan ee magdhawga shaqaalaha, eeg Sharciyada Minnesota, Qeybta 176.135.

### A. Qorshayaasha daryeelka maareysan ee shahaadeysan

Shaqo-bixiyeyaasha qaarkood waxay ka qeyb qaataan qorshe magdhawga shaqaalaha oo lagu maareeyo daryeel caafimaad (CMC) oo shahaado haysta. Waxaa jira saddex qorshe CMC ah oo la oggolaaday ee ku yaal Minnesota:  CorVel, Genex iyo HealthPartners. Waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo inaad hesho daaweynta caafimaad adoo adeegsanaya qorshayaashan, haddii aan:

- aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah;
- aad rabto inaad daryeel ka hesho bixiye caafimaad kale oo awood u leh inuu daweeyo dhaawacaaga oo kuu daweeyay ugu yaraan laba jeer labadii sano ee la soo dhaafay ama uu leeyahay taariikh la diiwaan geliyay oo kuu daweyn jiray;
- aad ku nooshahay ama ka shaqeyso meel ka fog bixiye caafimaad oo ku jira qorshaha (xadka waa 30 mayl gudaha gobollada toddobada ah ee Twin Cities iyo 50 mayl dhammaan meelaha kale).

### B. Baaritaanada caafimaad ee madax-bannaan (independent medical examinations – IME)

Waqti ka mid ah marka aad helayso faa'iidooyinka magdhawga shaqaalaha, shirkadda caymiska waxay ku weydiisan kartaa inaad isbaaro dhakhtar ay iyagu doorteen, kaas oo badanaa loo yaqaan baaritaanka caafimaadka ee madax-bannaan (IME). Haddii aad diiddo inaad dhakhtarka isbaaro, shirkadda caymiska ayaa joojin karta faa'iidooyinkaaga. Shirkadda caymiska waa inay kugu soo celisaa kharashaadka safarka iyo kharashaadka kale ee la xiriira ka-qaybgalka baaritaanka, oo ay ku jiraan huteelada iyo cuntada, iyadoo ku xiran inta ay kaa fog tahay meesha baaritaanka. Haddii aad codsato, shirkadda caymiska waa inay ku siisaa nuqul ka mid ah warbixinta IME.

## 10. Adeegyada dib-u-tababar xirfadeed

Adeegyada dib-u-tababar xirfadeed waxaa loogu talagalay in lagaa caawiyo inaad shaqo ku noqoto dhaawacaaga ka dib. Adeegyadani waxay kaa caawin karaan inaad shaqo ku hesho heer mushahar ku habboon iyadoo lagu saleynayo xayiraadaha shaqadaada.

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto adeegyada dib-u-tababar xirfadeed haddii:

- aadan awoodin inaad ku noqoto shaqadii caadiga ahayd ee aad haysay taariikhda dhaawacaaga;
- shaqo-bixiyahaaga aanu awoodin inuu ku siiyo shaqo ku habboon xayiraadahaaga shaqo ama aad shaqeyso iyadoo khasaaro mushahar ah.

### A. Sida loo codsado dib-u-tababar xirfadeed; sharaxaadda "QRC"

Waxaad codsan kartaa dib-u-tababar xirfadeed waqti kasta. Haddii aad aaminsan tahay in adeegyada dib-u-tababar xirfadeed ay waxtar kuu yeelan doonaan, u qor shirkadda caymiska si aad uga codsato la-talin dib-u-tababar xirfadeed oo lala yeesho la-taliye dib-u-habaynta xirfadeed oo aqoon leh (QRC).

Liiska QRC-yada waxaa laga heli karaa khadka tooska ah dli.mn.gov/business/workers-compensation/work-comp-qrc-vendor-directories. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Miiska Caawinta Magdhawga Shaqaalaha adoo isticmaalaya iimaylka helpdesk.dli@state.mn.us ama lambarrada taleefoonka 651-284-5005 (riix 3) ama 800-342-5354 (riix 3) wixii macluumaad dheeraad ah.

Si aad uga hesho la-talin dib-u-tababar, shirkadda caymiska ayaa laga yaabaa inay kuugu gudbiso QRC ama waxaad dooran kartaa mid adiga kuu gaar ah. Haddii aadan dooran QRC si loogu qabto la-talin, waxaad haysataa ilaa 60 maalmood ka dib marka qorshaha dib-utababarka laga diiwaan geliyo DLI si aad uga codsato QRC kale. Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad beddesho QRC xilliyo kale. La xiriir Miiska Caawinta haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.

QRC waa in ay noqoto mid si xirfadeed ah dhexdhexaad u ah. QRC-ga wuxuu qabtaa la-talin dib-u-tababar xirfadeed si uu u go'aamiyo haddii aad u qalanto adeegyada dib-u-tababarka wuxuuna kaa caawin karaa maaraynta ballamahaaga caafimaad. Haddii aad u qalanto, QRC-ga wuxuu qori doonaa qorshe dib-u-tababar ah oo isku dubaridi doona adeegyadaas. QRC-ga wuxuu la shaqeyn doonaa adiga, shaqo-bixiyahaaga, iyo shirkadda caymiska si loo qorsheeyo daaweynta caafimaad iyo adeegyada aad u baahan tahay si aad shaqo ugu hesho iyadoo loo eegayo xayiraadahaaga shaqo iyo heer mushahar ku habboon.

### B. Maareynta kiiska naafonimada; adeegyada dib-u-tababar xirfadeed

Shirkadda caymiska waxay kuu qoondeyn kartaa maareeye kiiska naafonimada (DCM), haddii aysan muuqan in aad shaqada ka maqnaan doonto in ka badan 90 maalmood, si uu kuu caawiyo ballamahaaga caafimaad iyo ku soo noqoshada shaqada. DCM wuxuu u shaqeeyaa shirkadda caymiska mana loo arko inuu dhexdhexaad yahay. Waxaad codsan kartaa la-talin dib-u-tababar xirfadeed oo lala yeesho QRC waqti kasta, xitaa haddii aad la shaqeyneysid DCM. Qof kasta oo hore kula soo shaqeeyay DCM ahaan ma noqon karo QRC-gaaga mustaqbalka.

### C. Dib-u-tababar ama ku noqoshada iskuulka si loo barto xirfad cusub

- Qorshahaaga dib-u-tababarka waxaa ku jiri kara dib-u-tababar, oo ah koorso rasmi ah oo waxbarasho oo loo marayo barnaamij iskuul oo loogu talagalay in lagu caawiyo shaqaalaha dhaawacmay inuu ku noqdo shaqo ku habboon oo faa'iido leh.
- Faa'iidooyinka dib-u-tababarka waxaa lagu xaddidayaa 156 toddobaad. QRC-gaaga ayaa mas'uul ka ah diyaarinta qorshahaaga dib-u-tababarka, waana in loo ansixiyo shirkadda caymiska iyo Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (DLI).
- Haddii taariikhda dhaawacaaga ay tahay Oktoobar 1, 2008, ama wixii ka dambeeya, waa inaad codsiga dib-u-tababarka ku gudbisaa DLI ka hor inta aan 208 toddobaad la bixin oo ah isku darka faa'iidooyinka naafo ku-meel-gaar ah oo dhammeystiran iyo naafo ku-meel-gaar ah oo qayb ah.

## 11. Waxaad sameyn karto haddii shirkadda caymiska ay diido dacwaddaada

Haddii shirkadda caymiska ay diido dacwaddaada, waa inay kuu soo dirto Foomka Ogeysiiska Go'aanka Mas'uuliyadda Hore ee Shirkadda Caymiska oo sheegaya in ay diiday mas'uuliyadda hore ee dacwaddaada. Foomku waa inuu si cad u sharaxo xaqiiqooyinka iyo sababaha ay shirkadda caymiska u adeegsanayso diidmada dacwaddaada. Haddii aad ku qilaafsan tahay diidmada, waxaad haysataa doorashooyin aad ku muran gelin karto go'aanka diidmada.

- Waad la hadli kartaa hagaajiyaha dacwadda caymiska ee gacanta ku haya dacwaddaada si aad u ogaato haddii ay dib uga fiirsanayaan go'aanka.
- Waad gudbin kartaa Foomka Dacwadda Shaqaalaha (Employee's Claim Petition) ee Xafiiska Dhagaysiga Maamulka (Court of Administrative Hearings).
- Waad la xiriiri kartaa qareen kuu sharxi kara xuquuqdaada oo kuu gudbin kara dukumentiyada la xiriira muranka diidmada.
- Waad wici kartaa qeybta Dib-u-tababar Xirfadeed ee DLI lambarka 651-284-5038 ama 888-772-5500, si aad uga codsato latalin dib-u-tababar haddii aad u baahan tahay caawimaad QRC si aad shaqada ugu soo noqoto, laakiin dacwaddaada waa la diiday.

## 12. Waxaad sameyn karto haddii aad dhibaato kala kulanto faa'iidooyinka dacwad la aqbalay

Dacwooyinka magdhawga shaqaalaha intooda badan waxaa la bixiyaa iyada oo aan wax dhibaato ah ka jirin. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira dhowr arrimood oo aad sameyn karto haddii aad dareento inaadan helin faa'iidooyinka saxda ah, inaadan helin lacag celinta saxda ah ee safarka ama kharashaadka, faa'iidooyinkaaga la joojiyay, ama aad qabto su'aalo kale.

- Waad wici kartaa hagaajiyaha dacwadda caymiska. Qor taariikhda, waqtiga, iyo magaca hagaajiyaha diiwaankaaga. U sharax dhibaatada oo isku day inaad xalliso. Dhibaatooyin badan ayaa lagu xallin karaa wicitaan taleefoon. Haddii aadan la xiriiri karin hagaajiyaha dacwadda, waxaad codsan kartaa inaad la hadasho maamulkooda.
- Waad wici kartaa Miiska Caawinta Magdhawga Shaqaalaha ee DLI haddii dhibaatadaada aan la xallin, halkaas oo laguu gudbin doono khabiirka xalinta muranka ee ku caawin kara ugu wanaagsan. Khabiirku wuxuu sharxi karaa habka xalinta muranka wuxuuna bixin karaa macluumaad kaa caawinaya inaad go'aamiso habka ugu fiican ee aad dhibaatadaada ku xallin karto. Khabiirku talo sharci ma siin karo, laakiin wuxuu bixin karaa macluumaad kaa caawin kara inaad go'aansato waxaad sameyso.
- Haddii faa'iidooyinkaaga caafimaad ay ku jiraan qorshe daryeel maareysan oo shahaado haysta, waa inaad marka hore isticmaashaa habka xalinta muranka ee qorshaha daryeelka maareysan si aad u xalliso khilaafaadka la xiriira daryeelka caafimaadka. Qorshaha daryeelka maareysan waa inuu kaaga jawaabo 30 maalmood gudahood marka aad si qoraal ah ugu wargeliso dhibaatada.
- Haddii aad qabto muran la xiriira faa'iidooyinka caafimaadka ama dib-u-tababar xirfadeed, waxaad ka bilaabi kartaa muranka DLI ee Campus adoo booqanaya [campus.dli.mn.gov/user/login](campus.dli.mn.gov/user/login). Sidoo kale waxaad la xiriiri kartaa Miiska Caawinta DLI si aad u hesho caawimaad.
- Shaqaalaha aan matalaad ka helin qareen waxay ku bilaabi karaan muranka Campus ama waxay u diri karaan foom buuxa DLI.
- Ururrada shaqaalaha qaarkood iyo shaqo-bixiyeyaasha, gaar ahaan warshadaha dhismaha, waxay leeyihiin habraacyo gaar ah oo ay tahay in la raaco marka la xallinayo murannada. La xiriir wakiilkaaga ururka shaqaalaha si aad macluumaad dheeraad ah u hesho.
- Had iyo jeer waad wici kartaa oo aad kala hadli kartaa dacwaddaada qareen ku takhasusay magdhawga shaqaalaha kaas oo kuu sharxi kara xuquuqdaada. Inta badan qareennadu waxay bixiyaan latalin bilaash ah. Qareennada waxay keliya xaqiijin karaan lacag haddii ay ku guuleystaan xallinta muranka faa'iidooyinka adiga kuu ah.

## 13. Qarsoodiga diiwaanka

**Diiwaanka dacwadda gobolka**

Marka laga reebo xubnaha shaqaalaha DLI, waxa ku jira faylkaaga magdhawga shaqaalaha waxaa baari kara:  adiga

(shaqaalaha); shaqo-bixiyahaaga xilligii dhaawaca; shirkadda caymiska ee shaqo-bixiyahaaga; wakiilka shaqo-bixiyaha ama caymiska; dadka ku tiirsan shaqaale dhintay; ama qof kasta oo haysta oggolaansho qoraal ah oo adiga ama dadka kugu tiirsan ka yimid.

Si loo ilaaliyo aqoonsigaaga, DLI waxay dacwooyinka u qoondeysaa lambar gaar ah oo sagaal-god ah, oo loo yaqaan lambarka aqoonsiga shaqaalaha (WID). DLI waxay kaliya isticmaali doontaa lambarka WID waraaqaha ay soo dirto. Uma baahnid inaad ogaato lambarkaaga WID si aad su'aalo uga weydiiso DLI dacwaddaada, laakiin DLI waxay rabtaa inaad ka warqabto isticmaalka lambarka WID.

Haddii aad la xiriirto DLI oo aad wax ka weydiiso dacwaddaada magdhawga shaqaalaha, waxaa lagu weydiin karaa inaad bixiso xog gaar ah ama qarsoodi ah (lambarkaaga Bulshada ee Amniga ama WID). Waad diidi kartaa bixinta xogtan, laakiin markaa DLI ma awoodi doonto inay ku caawiso su'aashaada ama dhibaatadaada. Xog kasta oo gaar ah ama qarsoodi ah oo aad bixiso waxaa isticmaali doona xubnaha shaqaalaha DLI ee haysta oggolaanshaha gelitaanka xogta; waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa baaritaannada gobolka iyo tirakoobyada. Xogta waxa loo gelin karaa faylka dacwaddaada; sidaas darteed, waxaa la siin karaa:  qof kasta oo haysta oggolaansho ama amar maxkamadeed oo loogu talagalay faylka ama xogta; shaqo-bixiyaha iyo caymiska dacwaddaada; Maxkamadda Dhagaysiga Maamulka; Maxkamadda Racfaanka Magdhawga Shaqaalaha; Waaxda Caafimaadka Minnesota; Waaxda Dakhliga Minnesota; iyo Ururka Dib-u-celinta Magdhawga Shaqaalaha. Wixii macluumaad buuxa ah, eeg Minn. Stat. Qeybta 176.231, farqada 9-9b ee revisor.mn.gov/statutes/cite/176.231. Xog kasta oo aad bixiso waxaa la xaqiijin doonaa iyadoo loo marayo is-weydaarsiga xogta ee lala yeesho Maamulka Amniga Bulshada ee Federaalka.

## 14. Masuqmaasuqa

Qof kasta oo, iyada oo ujeedadu tahay khiyaano, hela faa'iidooyinka magdhawga shaqaalaha oo aan xaq u lahayn iyadoo si ogaal ah uu u khaldayo, u sheegayaa xog khaldan, ama ku guuldareystay inuu bixiyo xaqiiqo muhiim ah, waa dambiile xatooyo ah waxaana lagu xukumi doonaa iyadoo la raacayo Minn. Stat. Qeybta 609.52, farqada 3.

La xiriir Waaxda Ganacsiga Minnesota, Qeybta Ka Hortagga Musuqmaasuqa si aad uga warbixiso suurtagalnimada khiyaanada magdhawga shaqaalaha adoo wacaya 888-372-8366.

## 15. Sida loo helo jawaabaha su'aalahaag

Shirkadda caymiska ee shaqo-bixiyahaaga waxay ku siin kartaa jawaabo su'aalo badan. Sidoo kale waad la hadli kartaa qareen ku saabsan dacwaddaada. Waxaad la xiriiri kartaa Miiska Caawinta Magdhawga Shaqaalaha ee DLI adigoo isticmaalaya iimaylka helpdesk.dli@state.mn.us, lambarka taleefoonka 651-284-5005 (riix 3) ama 800-342-5354 (riix 3) inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Ugu dambeyn, waad wici kartaa Xafiiska Difaaca Magdhawga Shaqaalaha lambarka 651-284-5013 ama 800-342-5354.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan magdhawga shaqaalaha waxaa laga heli karaa bogga internetka ee DLI dli.mn.gov/workers/workers-compensation-workers.

## 16. Ilo kale oo ka socda qaybaha saddexaad

Waxaa jiri kara ilo dheeraad ah oo adiga ama kuwa kugu tiirsan aad u qalmi kartaan oo ka baxsan faa'iidooyinka lagu bixiyo nidaamka magdhawga shaqaalaha ee Minnesota. DLI waxay ku siin kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilo ka baxsan hay'adaha saddexaad inta lagu jiro dacwaddaada, oo ay ku jiraan kuwo kaabaya hagahan. DLI ma maamusho ama ma shaqeyso, mana ka mas'uul aha, waxa ku jira, saxsanaanta, ama ra'yiga ay bixiyaan hay'ad kasta oo saddexaad, adeeg, ama ilo lagu bixiyo agabka kaabaya ee hagahan. Tixraaca hay'ad, adeeg, ama ilo saddexaad oo gaar ah

waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo macluumaad iyo fududeyn dadweynaha, mana aha in loo qaato inay tahay taageero ama talo soo jeedin ka timid DLI.

Iyadoo la raacayo heerarka qarsoodiga diiwaanka DLI ee la xiriira dacwooyinka magdhawga shaqaalaha, DLI ma siin doono ama ma shaacin doono xogtaada khaaska ah ama ilaalinta leh ee ku saabsan faylka magdhawga shaqaalahaaga hay'ad, adeeg, ama ilo saddexaad, haddii aan si cad lagu oggolaan adiga ama kuwa kugu tiirsan ama haddii aan si kale loo oggolaan sharciga.